Foomka Cabashada

Sida aan kuu caawin karno

Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC) ee Biritish Kolombiya (BC) waa hay'ad dhexdhexaad ah – kana madaxbannaan booliiska iyo dawladda. Waxaan qabanaa cabashooyinka ku saabsan booliiska degaanka oo lana soconaa baaritaanadooda. Waxaan halkaan u joognaa in aan wargalino, la talino, oo caawino qof kasta oo ku lug leh habka cabashooyinka booliiska.

Xusuusnow: Annaku mas'uul ***kama*** *nihin cabashooyinka Booliiska Dawladda Federaalka ee Kanada (RCMP). Haddii aad rabtid in aad soo gudbisid cabsho ka dhan ah sarkaal ka tirsan ciidanka Booliiska Dawladda Federaalka ee Kanada (RCMP), la xiriir Guddiga Dib-u-eegista iyo Cabashooyinka Rayidka ah (CRCC).*
www.crcc-ccetp.gc.ca

Taageerada iyo Caawimaadda

Waxaa jira taageerooyin ballaaran oo kala duwan oo la helo si lagaaga caawiyo habka cabashada, oo ay ka mid yihiin adeegyada turjumaadda qoraalada iyo afka. Wixii caawin ah ee helitaanka taageerada ku habboon baahiyahaaga, fadlan xafiiskeena ka wac **1 (877) 999-8707** weydiisana Iskuduwaha Wacyigalinta iyo Helitaanka adeegyada.

Soo gudbinta cabashadaada

Hadba sida uu Foomkaaga Cabashadu uga sii dhamaystiran yahay, ayey uga sii fududaan kartaa in wax looga qabto.

- **Ka hor inta aadan bilaabin** Dib u eeg Foomka Cabashada ee hoose soona uruuri dhammaan xogaha loo baahan yahay si aad u qeexdid cabashadaada.
- **Dooro nooca cabashada aad soo gudbineysid.**
- **Buuxi oo soo gudbi Foomka** Waxaad Foomka Cabashadaada oo buuxsan ku soo gudbin kartaa barteena internetka, iimeyl, boostada ama fakis (fax), ama waxaad gacanta ugu geyn kartaa saldhigga booliiska degaanka. Waxaad kaloo cabashadaada telefoon ugu gudbin kartaa shaqaalaha Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC), adiga oo wacaya **1-877-999-8707** (lacag la'aan), ama xafiiskeena.

Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska
2nd Floor, 947 Fort Street, PO Box 9895 Stn Prov Govt, Victoria, BC V8W 9T8
Telefoon: **(250) 356-7458** Fakis: **(250) 356-6503** iimeyl: **info@opcc.bc.ca** Barta Internetka: **opcc.bc.ca**

Soo gudbinta cabashadu waxay bilaabi doontaa habka cabashada. Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC) wuxuu dib u eegaa dhammaan cabashooyinka waxaana dhici karta in lagula soo xiriiro haddii xogo dheeraad ah loo baahdo. Haddii aadan rabin in aad ka qeybgashid habka cabashada ee rasmiga ah, waxaad toos ula xiriiri kartaa waaxda booliiska si aad ugu gudbisid su'aasha ama walaaca aad qabtid. Waaxyaha booliiska waxaa looga baahan yahay in ay diiwaangaliyaan su'aalaha ama walaacyada una sheegaan Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC) sidii wax looga qabtay. Xafiiska Madaxa Cabashada Booliisku (OPCC) wuxuu dib u eegi doonaa xogaha diiwaanka si loo xaqiijiyo in sidii ku habbooneyd wax looga qabtay.

Dooro nooca cabashada aad soo gudbineysid

Cabashooyinka Booliiska

Cabashadaadu ma waxay ku saabsan tahay **anshaxa** (habdhaqan, ereyo, ama falal) sarkaal booliis ah?
Haddii jawaabtu haa tahay, taasu waa ka cabasho booliis. Cabasho Booliis oo kasta waxaa habka rasmiga ah marsiiya oo dib u eega Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC) si loo go'aamiyo in ay u gudbeyso heer baaris rasmi ah. Haddii cabashadaadu u gudubto heerka baarista rasmiga ah, waxaad yeelan doontaa xuquuqo rasmi ah.

Sida uu qabo *Xeerka Booliiska Biritish Kolombiya* (*BC Police Act*) xuquuqdaada waxaa ka mid ah:

- In aad ka qeybgashid Habka Xallinta Cabashada ama Dhexdhexaaadinta.
- In si jooto ah laguu la socodsiiyo horumarka baarista cabashadaada.
- In aad heshid warbixinta go'aanka baarista ee ugu dambeysa.
- In aad talo ku darsatid edbinta ama sixitaanka ay kula tahay in sarkaalku helo.
- In aad codsatid dib u eegis go'aan haddii aadan ku qancin natiijooyinka.

Cabashooyinka Adeegga ama Siyaasadda

Cabashadaadu ma waxay ku saabsan tahay **adeegyada ama siyaasadaha** waaxda booliiska?
Haddii jawaabtu haa tahay, taasu waa cabasho adeeg ama siyaasad. Cabashooyinkaan waxaa dib u eega guddida booliiska ee waaxda booliiska degaanka. Madaxa Cabashada Booliisku wuxuu talooyin u soo jeedin karaa Guddida Booliiska ama Agaasimaha Adeegyada Booliiska sabab Cabasho Adeeg ama Siyaasad awgeed.

Cabashooyinka Adeegga ama Siyaasadda waxaa ka mid noqon kara walaacyada waaxda booliiska ee ku saabsan:

- Siyaasadaha (sharciyada iyo halbeegyada haga sida booliisku u bixiyaan adeeggooda.
- Tababarada arrimaha gaarka ah.
- Adeegyada (sida u yahay waxtarka ama tayada booliisku uga jawaabo codsiyada caawinta).

Dooro nooca cabashada aad soo gudbineysid

☐ Cabasho Booliis ☐ Adeeg ama Siyaasad ☐ Aan la Aqoon

Faahfaahinta Xogaha Xiriiradaada

Fadlan bixi faahfaahinta xiriiradaada si aan kuula soo xiriirno. Cinwaanka iimeylkaaga iyo nambarada telefoonada ayaa naga caawin doona in aan toos kuula soo xiriirno.
Marka aad aragtid calaamadda xiddigta * xogtaasu waa mid loo baahan yahay si cabashadaada wax looga qabto.

Maqaamka Qofka (Ms., Mx., Mr.):_____

*Magaca Kowaad:_____ *Magaca Awoowe:_____

Cinwaanka Boostada:_____

Magaalada/Tuulada:_____ Gobolka:_____ Furaha Boostada:_____

*Cinwaanka Iimeylka:_____

Nambarka Telefoonka Xiriirka:_____ Nambarka Telefoonka Xiriirka ee kale:_____

*Taariikhda Dhalashada:_____
Maalinta / Bisha / Sanadka

Haddii aad rabto, fadlan noo sheeg sida aad jeclaan lahayd in laguugu yeero (ayada/ayadii, ayaka/ayakii, asaga/asagii):_____

Haddii aad qabtid baahi gaar ah , tixgalin gaar ah ayaa la helaa. Fadlan noo tilmaan si aan u daboolno baahiyahaaga:

Ikhtiyaar ah: Xogaha Tirakoobka Bulshada

Ka jawaabidda su'aalaha ku saabsan jinsigaaga iyo isirkaaga ama sooyaalkaaga dhaqan waa **adiga iyo rabitaankaaga**. Taasu ma saameyn doonto adeeg kasta oo aan bixino ama go'aan aan gaarno haddii aad dooratid in aadan ka jawaabin su'aalaha.

Waxaan xogaha u aragnaa in ay aad nooga caawiyaan dhanka bixinta adeegyadeena. Waxaan uruurinaa xogaha dadka cabashooyinka soo gudbinaya dibna waan u eegnaa si aan u xaqiijino in aan dabooleyno baahiyaha kooxaha iyo shakhsiyaadka aan si buuxda loogu matalin habka cabashooyinka. Xogahaan gaarka ah waxaa loo hayn doonaa **sir ahaan** lala mana wadaagi doono waaxyaha booliiska ama guddiyada booliiska.

Waxaa nalaka rabaa in aan bulshada uga warbixino xogaha la uruuriyey, haseyeeshee waa la isku geeyaa si aan qof gaar ah looga aqoonsan karin. Xogahan waxaa ku jira tirakoobyo istaatistiko sida da'da, jinsiga, iyo isirka (Ayada oo la raacayo qeybta 177(2)(e)(i) *ee Xeerka Booliiska Biritish Kolombiya* (2010). Warbixinadaan kuma jiri doonaan wax xogo ah oo adiga lagugu aqoonsan karo. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan sida aan u uruurino xogaha tirakoobyada, fadlan nagala soo xiriir cinwaankaan **info@opcc.bc.ca.**

Jinsiga (Lab/Dheddig): (Fadlan noo sheeg jinsigaaga)_____

Isirka (Sinjiga): Fadlan xusuusnow, tusaalooyinka iyo sharraxaadaha hoose ma ahan liiska dhammaan isirada/sinjiyadaha dadka oo dhammaystiran.

Dooro dhammaan santuukhyada adoo muujinaya kuwa aad isleedahay in ay si fiican u sharraxayaan isirkaaga.

- ☐ **Madow –** Afrikaan, Afrikaan-Kariibiyaan, Afrikaan Kanadiyaan ka soo jeeda
- ☐ **Asal Dhalad (Indigenous) –** Quruumaha Kowaad (First Nations), Inuwit (Inuit), Meyti (Métis) ka soo jeeda
- ☐ **Laatiin –** Laatiin Ameerika ama Hisbaanik ka soo jeeda
- ☐ **Aasiyaan –** Shiineys, Kuuriyaan, Jabaaniis, Filibiini, Fiyatnaamiis, Aasiyaan Koofur-bari kale ka soo jeeda
- ☐ **Reer Bari Dhexe –** Carab, Afqaani, Turki, Kurdi, Iiraani, Aasiyada Galbeed ka soo jeeda
- ☐ **Aasiyaan Koofureed –** Koofur Aasiya ka soo jeeda, Hindi, Bakistaani, Bangaladheeshi, Sirilaankiis, Hindi-Kariibiyaan ka soo jeeda
- ☐ **Caddaan –** Reer Yurub ka soo jeeda
- ☐ **Koox Isir Kale –** fadlan noo sheeg: _____

Xogaha Cabashada

Fadlan ku buuxi xogaha ugu badan ee aad awoodid. Ku lifaaq warqado ama bogag dheeraad ah haddii loo baahdo.

*Goorma ayey dhacdadu dhacday? (Tusaale: qor 02/07/2019 halka July 2, 2019) _____ Saacaddee ayey dhacday?_____
Maalinta / Bisha / Sanadka

Xaggee dhacdadu ka dhacday? Fadlan sheeg faahfaahinta goobta, haddii la garanayo:_____

*Magaca Waaxda Booliiska ku lug leh:DOORO waaxda

Magaca ama nambarka baajka sarkaalka(sarkaalada), haddii la garanayo:_____

Nambarka galka dhacdada booliiska, haddii la garanayo:_____

Goobta ma joogeen wax markhaatiyaal ah? Haddi ay joogeen, fadlan qor liiska magacyadooda iyo xogaha xiriirkooda (haddii la garanayo):

Sharrax dhaawacyadaada, (haddii ay jiraan):_____

Haddii aad heshay daaweyn dhaawacyadaada awgeed, fadlan tilmaan goorta iyo goobta aad ka heshay:

Goorta:_____ Goobta:_____
Maalinta / Bisha / Sanadka

Sharraxaadda Cabashada

Si faahfaahsan u sharrax waxa gaar ahaan kugu dhaliyey in aad cabasho soo gudbisid. Isticmaal booska hoose kuna lifaaq bogag dheeraad ah haddii loo baahdo. Tixgalin sii in aad sharraxdid:

- Waxa sarkaalku (sarkaaladu) yiri, sameeyey, ama uusan sameyn.
- Waxa ay kula tahay in sarkaalku uu sameeyo ama yiraahdo bay ahayd.
- Wax dhaawac ama khasaare ah oo kaa soo gaaray waxa sarkaalku sameeyey ama uusan sameyn awgeed.
- Caddeymaha dhacdada ee aad haysid, sida sawirro, maqal, muuqaal, ama caddeymo caafimaad.
- Siyaasadda waaxda booliiska ee laga yaabo in aad cabashada ka qabtid.

Haddii arrintu ku dhacday qof kale adiguna aad markhaati ka tahay dhacdada, ku dar magaca iyo xogaha xiriirka qofka arrintu ku dhacday (haddii la garanayo).

Faahfaahinta Cabashada

Xallinta Cabashada

Waxaa laga yaabaa in ay jirto fursad aad heli kartid oo kula shaqeysid waaxda booliiska oo wadajir ku xallisaan cabashada adinka oo maraya habka xallinta khilaafka dadban ee loo yaqaan Xallinta Cabashada. Xallinta Cabadhadu way ka duwan tahay habka Baarista Rasmiga ah. Ujeedka ugu weyni waa in lagu siiyo fursad aad kula wadaagtid aragtiyahaaga kuna dhageysatid aragtiyaha sarkaalka ee dhacdada. Ma ahan in aad la kulantid sarkaalka si aad uga qeybgashid habka Xallinta Cabashada. Haddii habka xallinta cabashadu guuleysto waxaa la diyaariyaa heshiis xal oo rasmi ah oo dhexmara adiga iyo sarkaalka kaas oo qarsoodi ahaan doona.

Ma dooneysaa in aad ka qeybgashid Xalinta Cabashada?
Haa ☐ **Maya** ☐

Caddeyntayda

Waxaan caddeynayaa in xogahaanu ay yihiin run inta aan ka ogsoonahay. Waxaan ogahay:

- In cabashadaan ay baari karto Kooxda Ilaainta Anshaxa ee waaxda booliiska ee aan ka cabanayo, uuna la socon doono Xafiiska Madaxa Cabashada Booliisku (OPCC).
- In cabashadaan uu siin doono Taliyaha (Chief Constable) waaxda booliiska ee aan ka cabanayo, qof ka tirsan Kooxdooda Ilaalinta Anshaxa ama Guddiga Booliiska.
- In baare Kooxda Ilaalinta Anshaxa ama Khabiir Baaris ee Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC) uu igala soo xiriiri karo wixii xogo dheeraad ah igana codsan karo ka qeybgalkayga baarista, oo ay ka mid tahay bixinta caddeymo dheeraad ah.

*Fadlan saxiix Magaca Kowaad iyo Kan Awoowe halkaan ku qor

*Taariikhda aad saxiixday

Xorriyadda Xogaha iyo Ilaalinta Siraha
Xogaha gaarka ah ee aad ku bixisay Foomkaan Cabashada waxaa uruuriyey Xafiiska Madaxa Cabashada Booliiska (OPCC) sida uu qabo *Xeerka Booliisku* lana raacayo *Xeerka Xorriyadda Xogaha iyo Ilaalinta Siraha* (FOIPPA). Xogaha waxaa loo adeegsan doonaa baarista cabashadaada.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ilaalinta siraha gaarka ah, fadlan kala xiriir Xafiiska Madaxa Xogaha iyo Siraha ee Biritish Kolombiya **(250) 387-5629, info@oipc.bc.ca, ama booqo www.oipc.bc.ca.**

Qeybta Buuxinta Shaqaalaha Xafiiska (For Staff to Complete)

Receipt of a Complaint Form. To be completed by the person receiving this complaint:

I _____ from (agency) _____

acknowledge receiving this complaint on _____ Date/ _____ Month/ _____ Year at/ _____ am/pm

If you recorded the complaint, did the originator confirm their complaint's contents when it was read back to them?

☐ Yes. If not, what was done?_____

Was a copy of the complaint receipt given to originator? ☐ Yes

Forwarded to OPCC? Yes ☐ on _____ Date/ _____ Month/ _____ Year

This Complaint form and additional information provided by the complainant is to be sent to the OPCC for processing within the next business day of its receipt.